

Sidee ayaad u caawin kartaa?

Waxaan ognahay in ardaydu lagasoo bilaabo dugsiga barbaarinta ilaa dugsiga sare uu xaalkoodu fiican yahay marka qoysaskooda iyo dugsiyadu iskaashadaan.

Halkaan waxaad ka helaysaa shan talaabo oo aad qaadi karto si aad u taageerto dabeecada wanaagsan gudaha dugsiga:

1. La hadal cunugaaga kalana hadal sida aad uga doonayso inuu u dhaqmo markuu joogo dugsiga.
2. Waydii macalinka cunugaaga, maamulaha ama la-taliyaha dugsiga dabeecadaha wanaagsan ee dugsiga ilmaha baro.
3. U sheeg dugsigaaga sida aad doonayso inaad qayb uga noqoto taageerida dabeecadaha wanaagsan ee cunuga markuu dugsiga joogo.
4. Kala hadal macalinka cunugaaga ama la-taliyaha dugsiga haddii aad qabto su'aalo ama walaacyo la xariira dabeecada cunugaaga. Waxay doonayaan inay ku caawiyaan.
5. Xubin ka noqoto kooxda PBIS ee dugsigaaga.



Wixii xog dheeraad ah la xariir:

- **Macalinka cunugaaga, la-taliyaha/shaqaalaha arimaha bulshada ee dugsiga, ama maamulaha.**
- **La-taliyaha Kooxda taageerada heer gobal ee deegaanka ee PBIS ood ka helayso:**
- **Ohio Department of Education:** education.ohio.gov, raadi: PBIS for Families
- **Xafiiska Barnaamijyada Warbarashada Gaarka ah Xarunta Caawimaada Farsamada ee Caawimaadaha Dabeecadaha wanaagsan iyo Taageerooyinka:** pbis.org/family



Taageerida Dabeecadaha wanaagsan ee cunugaaga markuu Dugsiga joogo

Tusmada Qoyska ee Caawimaada Dabeecadaha Wanaagsan iyo Taageerooyinka



Dugsigeenu wuxuu adeegsadaa Caawimaadaha iyo Taageerooyinka Dabecada Wanaagsan (PBIS) si uu taageero Dabecada Wanaagsan ee cunugaaga.

Cilmi baaris lagu sameeyay dugsiyada Maraykanka oo la sameeyay intii lagu jiray 15 kii sano ee lasoo dhaafay ayaa muujinaaya in nidaamka loo yaqaano PBIS uu si waxtar leh kor ugu qaadaayo dabecada wanaagsan ee ardayda iyo jawiyada wanaagsan ee dugsiyada.

PBIS wuxuu ka shaqeeyaa la falgalida iyo dhiiri galinta ardayda sidii ay guul aqooneed u gaari lahaayeen. wuxuu diirada saaraa barista dabecad wanaagsan si ardaydu u noqdaan kuwo guul ka gaara dugsiga iyo noloshaba.

PBIS

- Wuxuu ka abuuraa bii'o dagan, oo wanaagsan gudaha dugsiga;
- Wuxuu barayaa arday kasta dabecadaha wanaagsan ee ay sida wanaagsan iskula shaqaynaayan;
- Wuxuu yareeyaa dabecadaha qas abuurka ah;
- Wuxuu kordhiyaa waqtiga waxbarashada, xaadirista iyo guusha; wuxuuna

- Ka dhigaa dugsigeena meel daryeel iyo badbaado leh oo arday kasta dareemaayo qadarin.

Anagoo adeegsanayna PBIS

Dugsigeenu:

- Wuxuu abuurayaa bii'o waxbarasho oo dhammaan ardaydu ay ku gaari karaan guul;
- Wuxuu dagsaday higsiiyo cadcad oo la isku raacay, xeerar iyo abaalmarino;
- Wuxuu la xariiraa qoysaska si dhammaan bulshadu ay uga wada shaqayso taageerida ardayda;
- Wuxuu leeyahay koox dad waawayn ah oo la socda xogta xaalka dabecada ka jirta dugsiga oo dajiya qorshe hormar lagu samaynaayo;
- Wuxuu taageerooyin gaar ah siiyaa marka ardayda iyo qoysasku u baahdaan caawimaad dheeraad ah;
- Wuxuu aaminsan yahay in dabecadaha wanaagsan ee dadka waawayn ay taageerayaan dabecadaha wanaagsan ee ardayda; wuxuuna
- Taageeraa dabecada wanaagsan ee shaqaalaha.